# Hannaanka Habka Beddelka ah ee California

## Su’aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

### SU’AALO GUUD

**Waa maxay Habka Beddelka ah?**
Hay’adaha gobolka oo kormeera xannaanada ilmaha waxay caadiyan sicirrada lacag-celinta ku saleeyaan adeeg-siinta qoyska oo adeeg-bixiyeyaashu lacagta ku dallacaan – sicirka suuqa – oo aan ahayn qarashyada dhab ahaan daryeelka lagu bixiyo. Arrinkaan, waxaa masuul ka ah hay’adda gobolka oo ah California Department of Social Services (CDSS).

Hase-ahaatee, gobolladu waxay ku saleyn karaan sicirrada *hab beddel ah* meeshey isticmaali lahaayeen sicirka suuqa. Habka ka duwan waxaa ku jiri kara moodal qarash si gacan looga geysto go’aaminta waxa sicirka lacag-celinta ee xannaanada ilmaha uu ahaan lahaa.

**Waa maxay moodal (qaab) qarash?**
Moodal qarash waa aalad wax laga beddeli karo, sida buug-xisaabeed Excel ah ama kalkoleytar khadka ku shaqeeya, oo isku dari kara qarashyada dhabtaa ee dhammaan qeybaha xannaano ilmo iyo barnaamij kobcin, adeeg, ama nidaam.

**Maxaa moodal qarash muhiim u yahay?**
Moodal qarash wuxuu caawiyaa hubinta dhammaan cunsurrada (qeybaha) ka shaqeysiinta xannaano ilmo iyo barnaamij kobcin in lagu daro xisaabta markii la go’aaminayo qarashka dhabtaa iyo go’aaminta sicirrada lacag-celinta.

Cunsurradaan waxaa ku jira mushaarka shaqaalaha iyo qarashyada shaqaalaha, kirada iyo qarashyada goobta, manhajka iyo macluumaadka, caafimaadka iyo nabadgelyada, iyo dhammaan qeybaha ka shaqeysiinta hawlgallada barnaamijka. Maadaama moodallada qarashka wax looga beddeli karo heerar kala-duwan iyo xeerar, iyo barnaamij kale ama horumarinno tayo, maamulayaashu waxay si fiican u fahmi doonaan sida isbeddelladu u saameeyaan qarashyada.

### WAA MAXAY HANNAANKA HABKA BEDDELKA AH EE CALIFORNIA?

**Maxay tahay sababta California u abuureyso qaab beddel ah si lagu go’aamiyo sicirrada lacag-celinta?**
Si loogu faaiideeyo caruurta, qoysaska, iyo shaqaalaha xannaanada ilmaha iyo kobcinta, California waxay dejin doontaa sicirrada lacag-celinta xannaanada ilmaha oo ku saleysan (lagu-wargeliyay) qarashyada daryeelka ayadoo la isticmaalayo habka beddelka ah, meeshii la isticmaali lahaa sicirrada suuqa. Habka beddelkaa ee California wuxuu gobolka ka caawin doonaa in:

- Si fiican loogu fahmo inta uu le’eg yahay qarashka adeeg-bixiyayaasha ku kaca si ay u bixiyaan xannaano ilmo oo tayo sare leh iyo adeegyada kobcinta kuna sii jiraan ganacsiga.
- La abuuro aalad gacan ka geysata qiyaasidda qarashka dhabtaa ee daryeelka oo ku saleysan xogta adeeg-bixiyeyaasha iyo ilaha kale oo loo isticmaali karo si loogu wargeliyo dejinta sicirrada. Aaladdaan waxay qiyaasi doontaa qarashyada daryeelka loogu talagalay barnaamij kale duwan ayadoo la isticmaalayo arrimo kala duwan sida cadadka barnaamijka, goobaha juqraafiyeed, iyo da’aha caruurta loo adeego.

**Yaa hogaaminaya hannaankaan?**
Prenatal to Five Fiscal Strategies (P5), hogaamiye qaran ee dhaqaalaha xannaanada ilmaha, sharuucda, iyo cilmi-baarista, ayaa hogaaminaya hannaanka oo la kaashanaya California Department of Social Services (CDSS).

**Sidee tan ula xiriirtaa Qarashka California 2022 ee Daraasadda Tayada?**
Hannaanka Habka Beddelka ah ee California waxaa lagu dul-dhisayaa Qarashka California 2022 ee Daraasadda Tayada waxaana loo isticmaali doonaa wargelinta sicirrada lacag-celinta ee xannaanada ilmaha ayadoo lagu naqshadeynayo laguna hirgelinayo hannaanka habka beddelka ah.

**Maxay tahay sababta ay u caawin mulkiilayaasha/adeeg-bixiyeyaasha xannaanada ilmaha iyo barnaamijta kobcinta hannaankaan?**
Ayadoo laga qeybqaadanayo xogtana si qarsoon loo wadaagayo, adeeg-bixiyeyaashu waxay ka caawin doonaan California hagidda sicirradeeda lacag-celinta xannaanada ilmaha waxayna caawin doonaan xaqiijinta macluumaadka la isticmaalo inuu ku saleysan yahay qarashyada dhabtaa, beddelka waxa waalidiintu awoodaan, ama sicirka suuqa.

## KULAMADA TALO-BIXINTA IYO QARASHKA RA'YI-ARUURINTA XANNAANADA ILMAHA

**Yay tahay inay ka qeybqaataan?**
Mulkiilayaasha iyo hawlwadeennada xannaanada ilmaha iyo barnaamijta kobcinta ee gobolkoo dhan waa inay ka qeybqaataan. Tan waxaa ku jira kuwa ka shaqeeya xarumaha xannaanada ilmaha iyo kobcinta, guryaha xannaanada ilmaha qoyska iyo barnaamijta qabiilka. Adeeg-bixiyeyaasha leysinka laga rabin ee qoyska, saaxiibka, iyo deriska (FFN) waa inay sidookale ka qeybqaataan.

Xarumaha iyo guryaha xannaanada ilmaha qoyska, agaasimaha barnaamijka, mulkiilaha/adeeg-bixiyaha, maareeyaha dhaqaalaha, ama ciddii kale oo haysa aqoonta ugu fiican ee dhaqaalaha barnaamijka iyo hawlihiisa ayaa ah qofka ugu fiican ka qeybgalka kulamada talo-bixinta iyo buuxinta ra'yi-aruurinta.

**Sidee iyo markee ka-qeybgaleyaashu buuxin karaan ra'yi-aruurin kana qeybgeli karaan kulan talo-bixin?**
Ra'yi-aruurinta waxaa laga buuxin karaa khadkaan: https://www.prenatal5fiscal.org/california/survey. Kulamada talo-bixinta badankood waxay ahaan doonaan khad waxaana laga heli karaa halkaan: https://www.prenatal5fiscal.org/california/input. Adeeg-bixiyeyaashu waxay u baahanyihiin inay ka qeybgalaan keliya hal kulan oo talo-bixin ah laakiin waa inay waqti hore is-diiwaangeliyaan. Ra'yi-aruurinta iyo kulamada talo-bixinta waxay socon doonaan illaa dayrta 2023.

**Ma in ay mulkiilayaasha, hawlwadeennada, iyo adeeg-bixiyeyaasha xannaanada ilmaha iyo kobcinta buuxiyaan baa ra'yi-aruurinta kana qeybgalaan kulan talo-bixin?**
Haah! Dhammaan mulkiilayaasha, hawlwadeennada, iyo adeeg-bixiyeyaasha xannaanada ilmaha iyo kobcinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay buuxiyaan ra'yi-aruurinta kana qeybgalaan kulan talo-bixin. Ra'yi-aruurintu waxay u oggolaataa xog badan oo khaas ah in laga wadaago qarashyada iyo hawlgallada. Kulamada talo-bixinta waxay siiyaan P5 jaansiga ay kula falgalaan wadahadal si si fiican loogu fahmo waayo-aragnimada khaaskaa ee bixinta adeegyada xannaanada ilmaha iyo kobcinta, oo ka saaida macluumaadka lagu bixiyo ra'yi-aruurinta.

**Macluumaadka la bixiyo dadweynuhu ma arki doonaa?**
Keliya xubnaha kooxda daraasadda P5 baa arki kara faahfaahinta adeeg-bixiyeyaashu wadaagaan, kooxduna waxay hubin doontaa kulli macluumaadka laga aruuriyo adeeg-bixiyeyaasha in qarsoodi loo hayo lana ilaaliyo. Keliya macluumaadka la isku daro ee adeeg-bixiyeyaasha oo dhan ka yimaada, lagana saaray macluumaadka aqoonsiga, ayaa lala wadaagi doonaa cid kasta oo ka baxsan kooxda daraasadda.

**Haddii adeeg-bixiyeyaashu buuxiyeen Qarashka 2022 ee Ra'yi-aruurinta Tayada, ma in ay buuxiyaan baa ra'yi-aruurintaan ama ka qeybqaataan kulan talo-bixin?**
Haddii adeeg-bixiyeyaashu ka qeybqaateen Qarashka 2022 ee Daraasadda Tayada macluumaadkooduna kaamil yahay, waxay haystaan ikhtiyaarka ay u fasaxaan kooxda daraasadda P5 inay xogtooda sanadkii hore la isticmaalo. Waa inay kooxda daraasadda P5 iimeel ugu soo diraan california@prenatal5fiscal.org kadibna P5 baa si toos ula soo xiriiri doonta. Hase-yeeshee, waxaan ku dhiirigelineynaa adeeg-bixiyeyaashaas inay qadariyaan ka-qeybgalka kulan talo-bixin, maadaama su'aalaha iyo niqaashku ka duwanaan doono kii sanadkii hore.

## KULAMADA TALO-BIXINTA

**Waa maxay kulan talo-bixin?**
Kulan talo-bixin (ama ra'yi-bixin) waa kulan kooxeed yar, khadk ah ama ka-fool ka-fool ah, halkaasoo adeeg-bixiyeyaashu ku wadaagi karaan waayo-aragnimooda xagga bixinta adeegyada xannaanada ilmaha iyo kobcinta. Waayo-aragnima/khibradaha waxaa ku jiri kara fursadaha iyo dhibaatooyinka la xiriira hawlaha barnaamijka iyo tayada barnaamijka. Adeeg-bixiyeyaashu waxay u baahanyihiin in ay ka qeybgalaan keliya hal kulan laakiin waa inay waqti hore is-diiwaangeliyaan. Liiska buuxa ee kulamada talo-bixinta waxaa laga heli karaa: https://www.prenatal5fiscal.org/california/input

**Maxaa adeeg-bixiyeyaasha la weydiin doonaa inay ku wadaagaan kulanka talo-bixinta?**
Ka-qeybgalayaasha kulamada talo-bixinta waxaa wax laga weydiin doonaa barnaamijkooda, sifooyinka tayada, caqabadaha bixinta daryeelka, iyo sidookale saacadaha la shaqeeyo iyo waqtiga saaidkaa (overtime).

**Maxaa adeeg-bixiyeyaashu u baahanyihiin si ay uga qeybgalaan kulan talo-bixin?**
Ka-qeybgalayaashu waxay u baahan doonaan in ay isku-xiraha (link) kulanka Zoom ku geli karaan kumbuyuutar, tablet, ama foon. Kulamada talo-bixinta waa hadal-wadaag ah, ka-qeybgalayaashuna waxay u baahan doonaan inay ka jawaabi karaan su'aalaha macluumaadna ka wadaagi karaan barnaamijkooda. Ka-qeybgalayaashu waxay sidookale buuxin doonaan cod-bixinno inta lagu guda-jiro kulanka Zoom.

**Waa maxay afafka lagu qaban doono kulamada talo-bixinta?**
Kulamada talo-bixinta waxaa lagu qaban doonaa Ingiriis iyo Isbaanish, iyo sidookale luuqadaha kale ee la codsado, illaa xadka macquulkaa.

**Waqti intee le'eg buu socon doonaa kulanka talo-bixinta?**
Kulamada talo-bixinta waxaa loo qabtay hal saac.

## RA'YI-ARUURINTA KHADKA EE QARASHKA XANNAANADA ILMAHA/HABKA BEDDELKA AH

**Waa maxay macluumaadka adeeg-bixiyeyaasha la weydiin doono inay ku wadaagaan ra'yi-aruurinta?**
Ra'yi-aruurintu waxay codsataa macluumaadka qarashka iyo miisaaniyada ee ku saabsan qarashyada caadiga ah ee ku haboon ka-shaqeysiinta barnaamijka xannaanada ilmaha iyo kobcinta ama qarashyada bixinta daryeelka qoyska, saaxiibka, ama carruurta deriska

Adeeg-bixiyeyaasha waxaa la weydiin doonaa inay wadaagaan macluumaadka sanad-xisaabaadkii hore, sida mushaarka shaqaalaha ama qiimaha saacadii, qarashyada shaqaalaha, kirada iyo qarashka goobta, macluumaadka fasalka iyo qarashyada kale. Waxaa sidookale la waydiin doonaa faahfaahin ku saabsan sida uu barnaamijku u shaqeeyo iyo noocyada dakhliga. Adeeg-bixiyayaasha qoyska, saaxiibka, iyo deriska lama waydiin doono mushaarka shaqaalaha ama qiimaha saacaddii ama qarashyada shaqaalaha laakiin waxa wax laga waydiin doonaa wixii qarash ah oo ay galaan (sida cuntada, gaadiidka, iyo agabka waxbarashada).

**Waa maxay macluumaadka loo baahan yahay si loo buuxiyo ra'yi-aruurinta?**
Mulkiilayaasha iyo hawlwadeennada xarumaha xannaanada ilmaha iyo kobcinta ama guryaha xannaanada ilmaha qoyska ee shatiga leh, bayaannada qarashka, miisaaniyadda sanadkii hore, jadwallada mushaarka, iyo warbixinada mushaarka iyo diiwaangelinta ayaa laga yaabaa inay waxtar badan yihiin oo diyaar ha kuu ahaadeen markaad buuxineysid ra'yi-aruurinta. Intaa waxaa dheer, adeeg-bixiyeyaasha guriga xannaanada ilmaha qoyska, foomka canshuurta IRS ee Jadwalka C ee ugu dambeeyay ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo maadaama su'aaluhu ay raacaan qaab la mid ah. Adeeg-bixiyeyaasha qoyska, saaxiibka, iyo deriska ayaa la waydiiyaa inay qiyaasaan iyo/ama sharraxaan noocyada qarashaadka ay galaan oo la xiriira daryeelka ay bixiyaan.

**Ra’yi-aruurintu intee in le’eg bey qaadan doontaa?**
Marka xogta qarashka iyo miisaaniyadda la aruuriyo si loo tixraaco, ra’yi-aruurintu waxay qaadan inta u dhexeysa 15 ilaa 30 daqiiqo iyadoo ku xiran nooca iyo baaxadda barnaamijka, iyo xaaladaha gaarka ah ee carruurta iyo qoysaska loo adeego.

**Waa maxay afafka ra’yi-aruurintu diyaar ku tahay?**
Ra’yi-aruurintu waxay diyaar ku tahay af Carabig, Shiineys fudud iyo midka caadiga ah, Ingiriis, Raashiyaan, Soomaali, iyo Isbaanish.

**Sidee adeeg-bixiyeyaasha goobo badan ka hawlgala u buuxin karaan ra’yi-aruurinta?**
Haddii barnaamij uu leeyahay meelo badan, meel kasta ra’yi-aruurin waa in loo buuxshaa. Hay’adaha ka-ballaaran ee leh goobo badan waxay codsan karaan wareysi beddelka buuxinta ra’yi-aruurin goob kasta loogu talagalay ayagoo P5 kala soo xiriiraya california@prenatal5fiscal.org ama (217) 469-5250.

**Su’aalaha ra’yi-aruurinta diyaar ma u yihiin fiirin?**
Nuqulka su’aalaha ra’yi-aruurinta wuxuu diyaar ku yahay Qarashka California 2023 ee Ra’yi-aruurinta Xannaanada Ilmaha. Dukumeentigaan waxaa ku jira dhammaan su'aalaha loogu talagalay dhammaan noocyada adeeg-bixiyeyaasha, halka nooca khadka ee ra’yi-aruurinta uu ka boodi doono su'aalaha qaarkood oo ku saleysan jawaababha su'aalaha hore. Adeeg-bixiyeyaasha waxay arki doonaan keliya su'aalaha khuseeya nooca barnaamijkooda marka ay buuxinayaan ra’yi-aruurinta khadka.

**Ikhtiyaar ma jiraa lagu bilaabo ra’yi-aruurinta laguna laabto hadhawna lagu dhameeyo?**
Haah. Adeeg-bixiyuhu wuxuu keydin karaa shaqada waana sii wadi karaa hadhaw ayadoo la bixinayo cinwaan iimeel. Adeeg-bixiyuhu wuxuu iimeel ka heli doonaa “Alchemer” oo wata isku-xire khaas ah si lagu dhameeyo ra’yi-aruurinta.

**Jawaabaha wax ma laga beddeli karaa kadib marka la gudbiyo ra’yi-aruurinta haddii khalad la sameeyay?**
Adeeg-bixiyeyaashu waxay iimeel u soo diri karaan california@prenatal5fiscal.org ama soo wici karaan (217) 469-5250 si jawaabahooda loo cusbooneysiiyo.

**Maxaa loo dooran karaa haddii nooca barnaamijka adeeg-bixiye uusan qornayn?**
Adeeg-bixiyeyaashu waxay xulan karaan nooca adeeg-bixiyaha kaasoo sida ugu dhaw waafaqsan barnaamijkooda.

**Barnaamij nooceeya baa loo dooran karaa haddii barnaamijka xannaanada ilmaha iyo kobcinta ka shaqeeyo dhulalka Qabiileed?**
“Xarunta xannaanada ilmaha Qabiileed” ama “guriga xannaanada ilmaha qoyska Qabiileed” baa loo dooran karaa, ayadoon la eegeyn in barnaamijka shati ka haysto gobolka, qabiilka, ama midkoodna.

**Qarashyada ma loo qiyaasi karaa adeegyo hadda mushaar laga bixin? Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa mutadawaciin awood inay u siinayaan barnaamijku inuu si buuxda u shaqeeyo.**
Haah. Tan waxay xaqiijinaysaa wakhtiga la geliyo barnaamijka inuu shaqeeyo in la qabto, xataa haddii ay tahay jago aan lacag laga-bixin. Mutadawaciinta waxaa loo qori karaa kaaliyeyaal ahaan, ama booska "kale" ee qaybta qarashyada shaqaalaha, mushaarka u dhigmana waa inuu noqdaa eber.

**Adeeg-bixiyeyaashu ma waxay ku jawaabayaan qarashyadooda dhabtaa, mise waxay ku jawaabayaan waxa ay u maleynayaan in ay ku kici *lahayd* haddii ay awoodi lahaayeen in ay helaan dhaqaalaha si buuxda loogu daboolo qarashyadooda?**
Marka la codsanayo qarashyada, ra’yi-aruurintu waxa ay inta badan codsaneysaa qarashaadka dhabta ah, sida mushaarka dhabta ah ama xogta mushaarka iyo qarashyada dhabta ah ee aan qofka shaqaalaha ahayn. Ra’yi-aruurintu waxay bixiysaa fursado kale oo lagu muujiyo waxa ku kacaya haddii si ku filan loo maalgeliyo, sida su'aalaha ku weydiiya wakhtiga lagu bixiyo hawlaha, haddii wakhtigaas lacageysan yahay iyo hadii kaleba. Isku-darka macluumaadkaan wuxuu caawiyaa xisaabinta sicirrada ku filan.

**Ma waxaa jira qarashyo khaas ah oo ra'yi-aruurintu dooneyso in ay fahanto?**
Ra'yi-aruurintu waxay si weyn diiradda u saareysaa qarashaadka shaqaalaha - waxa shaqaalaha la siiyo, qarashyada laga bixiyo, iyo qaababka shaqaalaynta. Kuwaan waa cunsurrada ugu waaweyn ee qarashyada barnaamijka ee ku salaysan cilmi-baarista.

Ra'yi-aruurintu waxay weydiisaa su'aalo ku saabsan qarashyada waaweyn ee ka baxsan shaqaalaha, sida kirada iyo qarashyada goobta, iyo sidoo kale su'aalo ikhtiyaari ah oo la xiriira dhammaan qarashyada kale ee aan shaqaalaha ahayn.

**Qof matalaya adeeg-bixiyaha sida tababare ma buuxin karaa ra'yi-aruurinta?**
Haah, qof kasta ayaa buuxin kara ra'yi-aruurinta, laakiin qofku wuxuu u baahan doonaa inuu heli karo xogta dhaqaalaha barnaamijka si looga jawaabo dhammaan su'aalaha.

**Ka warran haddii adeeg-bixiye uusan ka jawaabi karin su'aalaha mid ka mid ah? Maleyn ama qiyaas ma la bixin karaa?**
Su'aalaha ayagoo bannaan waa laga gudbi karaa hadii adeeg-bixiye uusan hayn jawaabta. Qiyaas sidookale waa la bixin karaa.

## DHIIRIGELINTA KA-QEYB-QAADASHADA

**Ma la bixin doonaa dhiirigelimo loogu talagalay ka-qeybgalka kulan talo-bixin ama buuxinta ra'yi-aruurinta?**
Qof kasta oo buuxinaya ra'yi-aruurin iyo/ama ka-qeybgalaya kulan talo-bixin ah waxaa la gelin doonaa bakhtiyaa-nasiib. Bil kasta, ku dhawaad 300 oo ka-qeybgale ayaa si aan kala sooc lahayn loo xulan doonaa.

Guuleystayaasha waxaa loo diri doonaa koodh gaar ah si ay u doortaan agab caruurnimada hore ee Kaplan Early Learning Company, oo lagu qiimeeyo ku dhawaad $100. Intaa waxaa dheer, dhammaan ka-qeybgalayaashu waxay heli doonaan koodh qiimo-dhimis ah si ay ugu isticmaalaan Kaplan Early Learning Company.

## TAAGEERO

**Xaggee aadaa haddii aan su'aalo qabo?**
Haddii aad wax su'aalaa ka qabtid ra'yi-aruurintaan ama u baahato taageero farsamo, fadlan kala xiriir Prenatal to Five Fiscal Strategies california@prenatal5fiscal.org ama (217) 469-5250 ama booqo www.prenatal5fiscal.org/california.